Caddad gaar ah oo ku saabsan Biyaha, Fayadhowrka iyo Nadaafadda




Warsidaha UNICEF Soomaaliya

OKTOOBAR 2008

# Biyuhu waa horseedka nolosha, horumarka, caafimaadka iyo nabadda

Iyada oo uu adduunku markii ugu horeysey u dabaaldegayo Maalinta Gacmodhaqashada ee Adduunka bisha Oktoobar, UNICEF, dadka Soomaaliyeed iyo shuraakada gudaha iyo kuwa dibadda ayaa xoogga saaraya muhiimadda saabuun ku gacmodhaqashada si loo wanaajiyo caafimaadka iyo si looga hortago faafidda cudurada. In kasta oo dadaalkan loo qaabeeyey in carruurta si dhaqso ah lagu gaaro, haddana waxaa halbowle u ah baahida loo qabo in la hubiyo in dadka oo dhan ay helaan agab fayadhowr oo nadiif ah. Marka si ku filan loo bixiyo, waxa adeegyadan bulshada ay ka qaybqaataan nabadgelyada beelaha iyaga oo yareynaya immaanshaha tartan aan caafimaad qabin oo keeni kara iskahorimaadyo.

Helitaanka biyo nadiif ah iyo fayadhowr dad ku filan waa xuquuq aasaasi ah oo ay leeyihiin dhammaan ragga, haweenka iyo carruurta. Maqnaanshaha ama yaraanta adeegyadan muhiimka ah ayaa yareyn kara awoodda ay bulsho u leedahay horumarka bulsho-dhaqaale iyo jiritaankeedaba. Dhibaatadani meel ay Soomaaliya kaga daran tahay ma jirto, iyada oo halista cudurada biyaha ka dha-sha ay aad u sarreeyaan oo saameynta arrimaha gudaha dalka iyo dibaddaba (sida qiimaha cuntada iyo biyaha ee sarreeya) ka dhacaya ay horeba u yareyeen awoodda ay bulshooyinku u leeyihiin in ay sii wadaan hawl-nololeedkooda. Intaa waxaa dheer, ilaha biyaha ee aan dadka ku filleyn oo dadka Soomaaliyeed ku keeni kara iskahorimaad ka dhasha ku tartamidda biyaha yar.

Soomaaliya waa dal ay biyaha aad ugu yar yihiin. Helidda biyo ammaan iyo joogtaba ah iyo agab fayadhowr ayaa ah dhibaato weyn, taas oo ay uga sii dartey burburin iyo bililiqo lagula kacay kaabayaashii biyo-gaarsiinta intii uu socdey dagaalka sokeeye, iskahor-imaadyada hadda socda iyo abaaraha iyo daadadka iska soo daba noqda. Waqtigan, waxaa lagu qiyaasey in keliya 29 boqolkiiba dadka Soomaaliyeed ay heli karaan biyo nadiif ah oo la cabbo iyo 37 boqolkiiba oo heli kara nidaam fayadhowr oo lagu asturo qashin-saarka dadka. Arrimahaan tusinaya heerka hooseeya ee ay bulshadu joogto ayaa sabab u ah nafaqo-darrada, taas oo la ogaadey in ay saameyn ku yeelaneyso waxbarashada iyo horumarka ilmaha. Bartamaha iyo Koonfurta Soomaaliya gaar ahaan, xaddiga nafaqo-darrada ayaa sannadihii dhowaa ahaa mid ka sarreeya heerka ugu hooseeya ee xaaladda degdegga ah, dhowaantanna, carruurta ku nool waqooyiga bari iyo waqooyiga galbeed ee dalka ayaa heerarka nafaqo-darradooda ay ka sii dareysaa. Arrinta iyana welwelkeeda leh waxa ay tahay adeegyada biyaha iyo fayadhowrka oo ay weheliso nadaafad xumo. Arrintani waxa ay keentey in uu kor u kaco xaddiga cudurada la xiriira biyaha sida shubanka (oo uu ku jiro daacuunka) oo sabab u ah geerida 20% carruurta shan jirka ka yar ee dalka ku dhinta.

UNICEF waxa ay shariikyadeeda kala shaqeyneysaa sidii loo beddeli lahaa ixsaa'idiyaadkan naxdinta leh iyo in la hubiyo in dadka Soomaaliyeed, gaar ahaan carruurta iyo haweenka, ay helaan biyo nadiif ah iyo fayadhowr ku filan.

*Christian*

Christian Balslev-Olesen
Wakiilka UNICEF, Soomaaliya

## Hawsha UNICEF ee Biyaha, Fayadhowrka iyo Nadaafadda ee Soomaaliya

Soomaaliya oo dhan, hawsha UNICEF ee biyaha, fayadhowrka iyo nadaafaddu waxa soo hoos galaya bixinta adeegyada waxqabadka degdegga ah, beddelidda hab-dhaqanka, fayadhowrka biyaha iyo nadaafadda iyo weliba sameynta hab-raaca (siyaasadda) iyo fulinteeda. Mashaariicdan isku wada xiran waxa ay wax ka qabanayaan dhibaatada daacuunka iyo cudurada kale ee ka dhasha biyaha; waxa ay diiradda saarayaan in miyi iyo magaalaba laga dhiso ilo biyo joogta ah laga helo iyo nidaamkii qaybintooda, iyaga oo hubinaya in ay adeegyadaas soo gaari karaan xubnaha ugu nugul iyo kuwa saboolka ah ee bulshooyinka. Waxaa la sameeyey ololayaal gaar ah oo bulshada lagu abaabulayo oo ku aaddan sidii biyaha guryaha loogu keydsan lahaa si ammaan ah iyo dhaqanka gacmo-dhashada oo la wanaajiyo, kuwaas oo toos ugu wajahan bulshooyinka iyo iyada oo dugsiyada loo marsiinayo waxbarashada nadaafadda.

UNICEF waxa ay bulshooyinka, shariikyada iyo maamullada degaannada iyo kuwa gobollada siineysaa taageero farsamo iyo qalab lagu dayactirayo laguna dhisayo ilo biyood cusub, nidaamka qaybinta biyaha iyo nidaamyo biyood oo dadban (sida nidaamka hoorsashada biyaha roobka, nidaamka ku shaqeeya qoraxda). Ka sokow awood-dhisidda bulshada ee dhinaca maareynta, ka shaqeysiinta, dayactirka ama dhiirigelinta shuraakada ganacsatada iyo maamulka, tani waxa ay awood dad u siineysaa in adeegyada bixinta biyaha si joogto ah loo helo.

Gobollada Waqooyi Bari iyo kuwa Waqooyi galbeed gaar ahaan, waxa la taageeraa dadaalka dowladaha hoose iyo bulshooyinku ay ku xoojinayaan kormeerka nidaamka biyaha iyo in ay dejiyaan hab-raacyo (siyaasado) iyo jaangooyooyin macquul/xaq ah. UNICEF waxa ay sii waddaa in ay ka taageerto maamullada gudaha sameynta

**Eeg bogga 5aad.**

**CADDADKAN KA AKHRISO**


| | |
|---|---|
| Faallada Wakiilka ee Muhiimadda Biyaha | 1 |
| Hawsha UNICEF ee Biyaha, Fayadhowrka iyo Nadaafadda | 1 |
| Maalinta Gacmo-dhaqashada Adduunka: Sheekadii Salmo | 2 |
| Cudurro ka dillaacey Burco, Somaliland | 3 |
| Wararka Barnaamijka | 3 |
| Sheeko ka timid degaanka: Awoodsiinta Bulshooyinka | 4 |
| Kor u qaadidda nolosha dadka ku soo barakacay Jowhar | 5 |
| Hawsha UNICEF ee Biyaha, Fayadhowrka iyo Nadaafadda | 5 |
| Maalgelinta | 6 |
| Nagala soo xiriir | 6 |


**Keliya 29% Soomaali ah ayaa hela biyo la cabbo oo ammaan ah ....**

# Soomaaliya oo u dabaaldegeysa Maalinta Gacmo-dhaqashada ee Adduunka bisha Oktoobar 15keeda

Iyada oo ay dunida u dabaaldegeyso Maalinta Gacmodhaqashada Adduunka 15ka Oktoobar, Salmo Saciid Muuse oo 9 jir ah waxa ay horeba u sii noqotey mid bulshadeeda ku nool xaafadda Biyo Kulule ee ka tirsan Boosaaso, Puntland ee Waqooyiga Bari ee Soomaaliya - uga dhex qareemeysaa gacmo-dhaqashada.

Salmo waxa ay ku guuleysatey tartan curis ku saabsan sida ay ku fahamtey muhiimadda saabuun ku gacmo-dhaqashada iyo dadaalka ay u gashey ka dhaadhicinta saaxiibadeed in ay sidaa sameeyaan. 15ka Oktoobar, dugsiga aasaasiga ah ee Salmo ay dhigato ee Biyo Kulule, ayaa ka mid noqon doona 90 dugsi oo ka qaybqaadan doona waxqabadyo toddobaad socon doona oo loogu dabaaldegayo Maalinta Gacmo-dhaqashada ee Adduunka taas oo lagu qaban doono saddexda gobol ee waaweyn: Somaliland (Waqooyi-galbeed Soomaaliya); Puntland; (Waqooyi-bari Soomaaliya) iyo Jowhar iyo Baydhabo oo ku yaalla Bartamaha Koonfureed ee Soomaaliya. In ka badan 20,000 oo carruur Soomaaliyeed ah ayaa la filayaa in ay ka qaybqaataan waxqabadyadaas.



*Salmo (bidix) oo gacmaheeda ku dhaqeysa saabuun iyo saaxiibteeda Naciima oo fiirineysa.* © *UNICEF Somalia/2008*

Iyada oo ay taageeryaan Guddiyada Waxbarashada Bulshada, naadiyada caafimaadka carruurta, madaxda diinta, waalidiinta, NGO-yada degaanka iyo saraakiisha maamullada degaanka ee Somaliland iyo Puntland, waxaa maalintaa la qaban doonaa bannaanbax ku saabsan saabuun ku gacmodhaqashada iyo iyada oo la qaybiyo saabuun, calaamado, koobab iyo boostarro ay fariintan af-Soomaaliga ahi ay ku qoran tahay: "*Caafimaadkeenu wuxuu ku jiraa gacmaheena.*" Qaar badan oo ka mid ah dugsiyada ka qaybgalaya – gaar ahaan kuwa Bartamaha iyo Koonfurta Soomaaliya – ayaa ka faa'iideysta adeegyada ay UNICEF taageerto ee biyaha, fayadhowrka iyo nadaafadda.

Curiskeeda (ka eeg hoos) Salmo waxa ay ku sharxaysaa muhiimadda ay leedahay saabuun ku gacmodhaqashada:

*"Waxaa la yiraahdaa Salmo Siciid Muuse, waxaan jiraa 9 sano waxaana dhigtaa galaaska 3xaad ee dugsiga hoose Biyo Kulule waxaan degnahay xafadda Biyo Kulule ee Boosaaso. Saaxiibtey ugu qaalisan waxaa la yiraahdaa Naciimo Siciid Salaad oo jirta 10 sano. Intaan dhiganayey iskoolka waxaan mar iyo laba maqli jirey shubanka. Waxaan is weydiin jirey waxa keena waxaan u qaatey in ay tahay caro Alle. Maalin maalmaha ka mid ah ayaan waxaan raadiyaha ka maqley in shubanku ka yimaad ficil khaldanoo dadka ay ku kacaan waxaana su'aalay macalinkayga waxa loola jeedo wuxuna igu yiri haddii aad adiga is nadiifiso waxaad badbaadinaysaa naftaada iyo dhammaan dadka kula nool, laakiin weli ma bixin jawaab i qancisay.*

*Maalintii ku xigtey ayaa iskoolka waxaa laga dhisey musqulo biyo leh oo loogu talagalay gabdhaha oo ka fog kuwa wiilasha, ka dib macalinkii ayaa yiri qof walboo isticmaalaya musqusha ha is nadiifiyo, markaasaan anoo yaabban waxaan waydiiyey saaxiibtay nadaafadda uu macallinku sheegayo waxay tahay waxay i tiri anba waan la yaabanahay oo maalin kasta waan qubaystaa iskoolka ka hor ee maxay tahay nadiifintu? Markaas ka dib ayaan arkay masawiro darbiga lagu dhajiyay oo leh calaamadda UNICEF taasoon garaneynin waxay tahay aan iyadoo kale aan ku arkay musqulaha, masawirada waxay leeyihiin gacmaha ku dhaqo saabuun ama dambas marka aad isticmaasho musqulaha si aad ugaga badbaado shubanka.*

*Maalintii xigtey ayaan waxaa is iri bal saaxiibtaa ma garatay oo waxaan weydiiyay inay garaneyso sababta uu macalinku u oran jirey haddii aad is nadiifiso adiga iyo ehelkaaba waad badbadaysan; waxay tiri ma garanayo markaasaan iri haddaad fahamto waxa ay masawirada darbiga leeyihiin haddii aad gacmahaaga ku mayrato saabuun ama dambas musqusha ka dib cudurka uma gudbaayo afkaaaga iyo kan walaalahaba marka sidaa daradeed waxan ardayda faray in ay maqlaan fariimaha masawirada oo aan u isticmaalno suuliyada si wanaagsan oon gacmaha ku dhaqano saabuun ama dambas xiliyada ka horreeya cunada ama isticmaalka suuliyada ka dib."*

**Cudurada biyaha la xiriira oo keena geerida 20% carruurta ku nool Soomaaliya**

# Magaalo qashinku tuulan yahay, shuban badanna uu ka dilaacey

Magaalada Burco oo ku taalla Waqooyi-iga Galbeed ee Soomaaliya ('Somaliland') ayaa ahayd mid qalalan ka dib markii ay baaqdeen roobabkii Gu'ga ee la filayay bilihii Abriil ilaa Juunyo. Si kastaba ha ahaatee, waxaa toddobaadkii labaad ee Sebtembar 2008 degaanka ka da'ay roobab yaryar kuwaas oo meelo magaalada Burco ka mid ah ka sameeyey balliyo ay biyo fadhiyaan.

Arrintan oo ay ugu darsantey xaaladaha fayadhowrka magaalada ee liita, gaar ahaan meelaha ay deggan yihiin dadka soo qaxay, taas oo ka dhalatey qashinka tuulan iyo qashin-saarka dadka oo meel walba daadsan.

Biyaha fadhiya ayaa sii qurma marka ay is gaaraan wasakhda iyo qashinka dhex yaalla jawiga kulul ee qoyan, taas oo cudurro iyo dulinno ay ka dhashaan. Dhibaatadu waxa ay ugu daran tahay xaafadaha iyo suuqyada iyo ilaha biyaha ee wasakhoobey, taas oo keentey badashada cudurada shubanka.

Xog laga heley cusbitaallada degaanka ayaa bixiyey in 151 qof la seexiyey 11 ilaa 24 Sebtembar, kuwaas oo 70 ka mid ahi ay carruur shan jir ka yar ahaayeen, iyada oo la soo sheegey geerida hal qof.

Si loola dagaallamo shubanka dillaacay, UNICEF waxa ay bilowdey olole koloriin loogu darayo biyaha iyo kuwo nadaafaddeed waxaana ay qaaddey tallaabooyin lagu hubinayo in qashinsaarka dadka loo asturo si ammaan ah. UNICEF waxa kale oo ay taageertey diyaarinta xarumo taabbogal ah oo ku habboon ku daweynta shubanka daran iyo maareynta, la socoshada, soo sheegidda iyo xaqiijinta cudurka. Waxqabadyadani waxa ay keeneen in cudurka iyo faafiddiisu ay yaraadaan. Imminka, xaaladda gacanta ayaa lagu hayaa, haseyeeshee tani micnaheedu ma ahan in cudurkii dillaacay uu dhammaadey hadda.

Haddana, Burco iyo degaannada kale ee Soomaaliya ayaa wax ka baran kara waayo-aragnimada tuulada Booco oo 50km u jirta magaalada ku taalla Koonfurta Dhexe ee Soomaaliya ee Baladweyne.

Laba sano ka hor, shan carruur ay da'doodku yar tahay shan sano jir ayaa ugu dhintey Shuban Biyood Daran iyo xannuun Daacuun looga shakiyey. Si arrintaas wax looga qabto, UNICEF oo kaashaneysa urur degaanka ah ayaa waxa ay iskudubarideen dadkii tuulada, kuwaa oo wax ka badan 80 boqolkiiba biyaha ay cabbaan ka heli jirey webiga, in dadka la siiyo *ChlorFlock* si ay gunta ugu dhigaan uguna daweeyaan biyaha ka hor inta aan cabbid loo isticmaalin. Arrintani waxaa dhammeystir u noqdey olalaha dhiirigelinta nadaafadda oo lagu beegsadey haweenka iyo carruuta iyo kooxaha ay ka mid yihiin macallimiinta, odeyaasha iyo dhallinyarada.

Ka dib, UNICEF waxa ay tuulada u sameysey ceel uu ku rakiban yahay bam-gacmeed. Dadka oo heley il ammaan ah oo ay ka heli karaan biyo la cabbo ayaa ka qayb qaadatey in isla markiiba ay hoos u dhacaan cudurada biyaha ka dhasha.

Haweeneyda u madaxda ah ururka haweenka ee tuulada ayaa tiri: "UNICEF waxa ay joojisey oo ay xakameysey faafidda cudurada iyada oo bixisey waxyaabo lagu daweeyo biyaha iyo iyada oo na tustey hab-dhaqanka cudurada sababa. Bixinta la bixiyey il biyo la cabbo oo nadiif ah leh ayaa hubisey in la helo nolol tii hore ka wanaagsan. Sanadkii xiga [2007], ma jirin shuban biyood ba'an."

## Wararka Barnaamijka

### In kasta oo ay caqabado jireen, haddana UNICEF waxa ay sii waddaa hawshii ay ku wanaajineysey nolosha carruurta Soomaaliyeed…

**Caafimaadka iyo Nafaqeynta :**

- UNICEF iyo NGO-ga degaanka ee Jumbo ayaa tallaalley in ka badan 142,000 oo carruur ay da'doodu u dhaxayso sagaal bilood ilaa 15 sanno oo ku nool xerooyinka Dadka Gudaha ku Barokacay ee Muqdisho iyo hareeraha waddada Afgooye-Muqdisho.
- Bartamaha Oktoobar, UNICEF iyo shariikyadeedu waxa ay qaybin doonnaan markii saddexaad cunto nafaqo badan leh (UNIMIX) oo la gaarsiin doono 55,000 oo carruur shan jir ka yar ah oo ku nool waddada Afgooye (qiyaastii 90%) iyo saddex xero oo Muqdisho ah oo ay ku jiraan dadka gudaha ku barokacay.
- UNICEF, oo kaashaneysa WHO, ayaa u diyaar garoobeysa Maalmaha Caafimaadka Carruurta – oo ah olole lagu gaarsiinayo waxqabad sameyn weyn ku yeesha badbaadada 1.5 milyan carruur shan jir ka yar ah iyo 1 milyan oo haween da'da dhalidda ku jira oo Soomaaliya oo dhan jooga, kaas oo isugu jira tallaal, Fitamin A, goryaan ka dilid, baaritaanka nafaqada, adeegyada fuuq-celinta iyo nadiifinta biyaha taas oo danta laga leeyahay ay tahay yareynta silica iyo dhimashada.
- Cuntada diyaarsan (Plumpy'doz) ayaa iyana la siin doonaa 138,600 oo carruur ah lixdii biloodba, taas oo ka dhigan tallaabo looga hortagayo nafaqo-xumo ba'an oo timaadda.

**Isgaarsiinta iyo Awood-siinta**

- Wasaaradda Caddaaladda ee Somaliland ayaa soo saartey sharci cusub oo garsoorka carruurta loogu talogalay oo ay ku jiraan qodobbo lagu ilaalinayo xuquuqda carruurta. Qodobadu waxa ay da'da mas'uulliyadda dembiilenimada uu ka dhigey 15 sano jir; waxa uu hubinayaa in dhammaan maxkamadaha degmooyinka iyo gobollada ay sameeyaan waaxo wax ka qabta dacwooyinka carruurta khuseeya; waxaana ay farayaan in carruurta la xiro oo keliya marka laga fursan waayo. UNDP iyo UNICEF ayaa taageerey furitaanka.

**Waxbarashada**

- UNICEF iyo shariikyadeeda degaanka ayaa waddada Afgooye iyo Muqdisho u dhexeysa ku bixiyey labaatan teendho iyo aasaaskooda oo fasallo ah, kuwaas oo u suurtageliyey in ay 1000 carruur ah ay waxbarasho helaan.
- UNICEF waxa ay 370 maamule dugsi oo ka kala socda saddex gobol oo Bartamaha Soomaaliya ku yaalla ku tababartey maareynta, cilmi-nafsiga waxbarashada, iyo sidoo kale waxbarashada xaaladda degdegga ah, taas oo ay ka faa'iideysteen 70,000 oo carruur ah. Tababarka waxaa barbar socdey nafaqeyn iyo casharo kor loogu qaadayo wacyiga dadka ee HIV/AIDS.
- Somaliland iyo Puntland, waxaa14 maalmood oo tababar waxbarashada dadban ah lagu siiyey macalimiinta iyo maareeyayaasha xarumaha waxbarashada dadban (200 iyo 260 midkiiba), si kor loogu qaado xirfadahooda macalliminimo iyo tan maareyn waxaana ka faa'iideysanaya 18,000 carruur iyo dhalinyaro ah.

**Biyaha, Fayadhowrka iyo Nadaafadda**

- UNICEF waxa ay taageertey koloriin ku daridda biyaha iyo dhiirigelinta nadaafadda ee 100,000 qof oo ku nool Baydhabo, Buurhakaba, Beledweyne, Hiiraan iyo Bardheera oo ku yaalla Bartamaha iyo Koonfurta Soomaaliya.
- Olole nadaafadeed ayaa ka socda magaalada Jowhar iyada oo lala kaashanayo Ururka Haweenka Jowhar taas oo lagu gaarayo 20,000 oo qof.
- UNICEF waxa ay maamulka Kismaayo ku taageereysaa waxbarashada nadaafadda iyo ololayaasha nadaafadda oo 12,000 qof lagu gaarayo. Intaa waxaa dheer, ilaa 10,000 oo qof ayaa ka faa'iideysanaya dayactirka iyo saarista bamka gacanta ee biyaha ceel ku yaalla bannaanka magaalada Kismaayo, kaas oo maaliyadda ay UNICEF u marisey hay'adda Muslim Aid.
- UNICEF waxa ay sii waddaa in biyo ammaan ah oo la cabbo ay siiso in ka badan 100,000 oo ah dad ku soo barakacay waddada Afgooye iyada oo u dhaamineysa biyo gaaraya 2,000,000 litir maalin kasta.

# Mashruuc awood-siin ayaa ka caawiyey bulsho reer Somaliland ah in ay wax ka qabtaan biyo yaraanta



*Xubno bulshada Tulli oo dhinac taagan berkad dhowaan la qodey.*
*© UNICEF Somalia/2008*

Biyaha ayaa ku yar tuulada Tulli ee Somaliland iyada oo ay dadku khasab ku tahay in ay wax ka badan maalin gelinkeed lugeeyaan masaafo dheer si ay biyo u soo dhaansadaan. Faadumo Sulub oo ah hooyo deggan degaankaa ayaa tiri, "Waxa aan gurigeyka ka kalihi jirey 12-ka saac ee subaxnimo si aan biyo uga doonto il-biyood aad inooga fog. Caadi ahaan waxa aan adeegsadaa dameer waxaana aan guriga ku soo noqdaa duhurkii. Kuwa aan haysan dameero waxa ay guriga ku soo noqdaan galabtii 10-ka saac."

Xaaladda ayaa dhowaanahan soo wanaagsanaatey iyada oo taana uu mahaddeeda leeyahay barnaamij awood-siinta bulshada ah oo dadka reer Tulli ka caawiyey in ay dhistaan Berkado 10 daqiiqo keliya looga socdo guryahooda.

Bulshada Tulli (oo 100 km u jirta Hargeysa) waxa ay ka tirsan tahay degmada Boorama waxaana ay mid ka tahay soddon beelood oo Soomaaliya ka wada tirsan oo ka faa'iideysanaya mashruuc ku saabsan Soo-kabsashada iyo Horumarinta ay Bulshadu Waddo oo ay taageerayaan UNICEF, Guddiga Qaxootiga Ee Denmark, UNHABITAT, DFID iyo Bankiga Adduunka.

Mashruuca waxa uu bulshada ka dhigayaa udub-dhexaadka qorsheynta iyo maareynta adeegyada bulshada isaga oo awood u siinaya in ay dejiyaan ajandaha horumarka iyo in ay saameyn ku yeeshaan maamulka ee aaney ka dhega xirnaanin. Sidaa daraaddeedna dhammaan waxqabadyadu waa kuwo ku saleysan baahi jirta: ay soo xusheen bulshooyinka lana hirgeliyey iyada oo ay ka qaybqaadanayaan bulshada iyo weliba iyada oo ay maamullada degaanka iyo kan dhexe ay si firfircoon ugu lug leeyihiin.

"Biyahu dhibaato weyn ayaa ay ku ahaayeen bulshadeenna, "waxaa yiri Cali Rooble, oo ah Guddoomiyaha Guddiga Horumarinta Bulshada (CDC). "Waxa aan rabney in xal waara loo helo dhibaatadan kaas oo loogu baahnaan lahaa nidaam tuubooyin biyo laga soo qaado il-biyood 30km halkan u jirta. Haseyeeshee, waxa aan xaqiiqsaney in ay arrintani noqoneyso mid aad u qaali ah ayna waqti qaadaneyso in dhaqaalahaa la raadiyo halka baahida aan biyaha u qabno ay ahayd mid markaas taagan. Taana waxa ay keentey in aan u xilano berkadaha maaddaama aan haysano biyo meel walba socda xilliyada roobka. Waa aan is abaabulney waxaana aan qodney 7 berkadood. Waxa aan mashruuca ka helney maaliyad aan ku shamiiteyno oo aan saqaf ku saarno labo ka mid ah toddobada berkadood. Waxa aan shamiiteyney hal berkad taas oo hadda buuxda ayna ka cabbaan 180 guri. Tan kalena waxa aan ku dhameystiri doonnaa bil gudaheed."

Xalka bulshada ku dhisan ma keenin oo keliya in dadka degaanka ay biyaha si sahal ah u helaan, ee waxa uu sidoo kale awood u siiyey carruurta – gaar ahaan gabdhaha – in ay dugsiga aadaan. Faadumo Sulub waxa ay qiraneysaa in labadeeda gabdhood ay mid keliya dugsiga u dirto, 'tan kalena guriga ayaa ay ii joogtaa si ay iiga caawiso hawsha guriga marka aan biyo aroorka ku maqanahay. Hadda oo aan tuuladayada berkad ku haysanno, waxa aan haystaa waqti aan guriga uga shaqeysto markaa waxa aan go'aansadey in aan gabadheyda dugsiga u diro. Kani waa toddobaadkii labaad intii ay dugsiga tegeyso."

Xiriirka u dhexeeya xubnaha bulshada ayaa wanaagsanaadey mashruuca daraaddii. "Habka loo wajahay ayaa ka duwanaa kuwii hore. Hay'aduhu maalin ayaa ay immaan jireen, waxa ay la hadli jireen odeyaasha, waana ay iska tegi jireen waxaana ay soo noqon jireen iyaga oo mashruuc wada," ayuu yiri Cali Rooble. Haseyeeshee, mashruucani waxa uu nala qaatey wadahadal ballaaran. Tababarayaashu waxa ay nala joogeen bil wax ka badan. Waxa ay taasi naga caawisey in aan si fiican annaga isufahamno oo aan dhibaatadeennana u fahamno. Si weyn ayaan ugu kala qaybsaneyn ka hor mashruucan arrinta xuduudaha degmada, maaddaama koox naga mid ahi ay rabtey in ay ka mid ahaato degmada Boorama halka ay kooxda kalena dooneysa degmada Dila," ayuu yiri Cali. "Mashruucu waxa uu naga caawiyey in aan xaqiiqsano in sida keliya ee ay bulshadeenu ku hormari karto ay tahay annaga oo wada shaqeyna. Tani waxa ay nagu dhiirigelisey in aan xal u raadinno arrinta xuduudda degmada la xiriirta Duqa magaalada Boorame ayaa nagala shaqeeyey in aan dhibaatadan xallino. Arrintaasna waxa ay keentey in aan xiriir aad u wanaagsan la yeelannahay Duqa Magaalada Boorama."

Mashruucu waxa haweenka u abuurey fursad ay kaga qaybqaataan arrimaha bulshada. Maymuuna Aadan Geelle, oo xubin ka ah Guddiga Horumarinta Bulshada ayaa tiri, "Haween ahaan, waxa aan ogaaney in ay danteena ku jirto in aan ka qaybqaadano horumarinta bulshada maaddaama ay kaalinteenu bannaan tahay iyo in marka aan ka qaybqaadano oo keliya danaheena lagu dayaro waxyaabaha bulshada muhiimadda siiso".

Lacaghayaha Guddiga Horumarinta Bulshada, Khadra Ismaaciil Cigaal ayaa tiri "Haweenku waa xubno muhiim u ah Guddiga Horumarinta Bulshada. Laba xubnood ayaan ku leenahay 9ka xubnood ee guddiga. Mid naga mid ahi waa lacaghaye tan kalena waxa ay haysaa buugga jeegga. Guddigu wax dhaqaale ah ma bixin karo haddii aaney oggolaanin gabadha haysa buugga jeegga." Sharciga Guddiga Horumarinta Bulshada ayaa isna qeexaya in kooramka shirarka guddigu aanu buuxsameynin haddii aaney ku jirin laba xubnood oo haween ah. La'aantoodna, lama qaban karo wax shir ah, lamana qaadan karo wax go'aan ah.

Tababaraha bulshada, Maxamed Cabdi Ciise ayaa ku sheegey arrinta ugu muhiimsan mashruucan horumarinta bulshada in ay tahay in uu bulshada ku abuurey in ay ogaato in ay iyagu qaadi karaan tallaabo ay ku wanaajinayaan xaaladda noloshooda. Tan waxaa inoogu xigi doona mashruuc quudinta ardayda dugsiyada ah; "Abaarta daraadeed, waxa aan dooneynaa in aan hubinno in carruurteena ay dugsiga ku sii jiraan," ayuu yiri Maxamed. Hadda waxa aan dhisney jikadii, waxa aan hay'adaha weydiisan doonnaa in ay naga gargaaraan maacuunta jikada iyo cunto ilaa beeraha ay soo go'aan."

## Keliya 37% Soomaali ah ayaa hela hab fayadhowr oo lagu asturo qashin-saarka dadka

# Gargaarka UNICEF ayaa gacan ka geystey wanaajinta nolosha Dadka Gudaha ku Barakacay ee ku nool Jowhar

Magaalada Jowhar (90km waqooyiga Muqdisho) ayaa si aad ah ay ugu soo qulqulayeen dad gudaha ku barakacay ka dib markii ay kordheen iska-horimaadyada u dhexeeya ciidamada dowladda iyo xoogagga ka soo horjeeda ee ka dhacay magaalo madaxda dhammaadkii 2007. Dadkaas tirada badan ee sida lama filaanka ah ku yimid ayaa culeys weyn ku noqdey adeegyada fayadhowrka iyo helidda biyo ammaan ah oo la cabbo waxaana ay taasi dhakhsaba keentey in uu dillaaco shuban biyood daran. Waxaana taas barbar socdey nafaqo-darro soo if-baxdey. Arintu si kastaba ha ahaatee, tiro u dhaxaysa 5,000 ilaa 10,000 qoys ayaa ay dhibaatadu saameysay, awood-doodii ay dhibaatada haysata wax kaga qaban lahaay-eenna waxaa si aad ah u yareeyey dhaqaale la'aan.



*Gabar yar oo wejigeeda dhaqeysa.* © *UNICEF Somalia/2007*

UNICEF oo arrintaasi wax ka qabaneysaa waxa ay maal-gelisey dhisidda nidaam yar oo biyo lagu helayo oo laga fuliyey xerada Sheekh Cumar ee dadka gudaha ku bara-kacay ee ku taalla waqooyiga-bari ee Jowhar iyo dhis-maha musqulo loo dhisey xerooyinka Sheekh Cumar iyo Kalagooye, iyada oo taageerada shariik la heley.
Arrintaa waxa ka dhalatey in uu si aad ah hoos ugu dhaco Shuban Biyoodka Daran ee xerooyinka dadka soo bara-kacay dhexdooda. Helitaanka biyaha nadiifta ee la cabbi karo ee qoysaska dadka gudaha ku barakacay oo kordhey awgeed waxa ay haweenka siisey waqti ay ku daryeeli karaan carruurtooda iyo weliba fursado wanaagsan ay ku mashquulaan hawlo yaryar oo ay dhaqaale ku soo saaraan taas oo iyana keentey in heerkooda nololeed uu kor u kaco. UNICEF iyo shariikyadeedu waxa ay wax ka qabteen dhibaatada nafaqo-darrada iyaga oo bixinaya cunto dheeri ah oo loogu talogalay caruurta ay nafaqodar-radu hayso.

Carruurtii hore biyo uga soo aroori jirey Webiga Shabeelle ee uu yaxaasku ka buuxo oo saddex kilomitir u jira xerooyinka dadka gudaha ku barakacay ayaa iyana nastey ka dib markii la rakibey hannaanka biyo bixinta. Arrintaasi kama ayan badbaadin oo keliya in uu yaxaasku soo weeraro, laakiin carruurta waxa ay awood u yeesheen in ay ku noqdaan dugsiyada, waxaana ay heleen waqti dheeri ah oo ay ku cayaaraan.

Sheekh Cumar oo ah hogaamiye diimeed oo dadka gudaha ku barakacay u fasaxay in ay degaan qayb ka mid ah dhulkii awoowyaashii uu ka dhaxley, ayaa ku ammaaney UNICEF doorkii ay ka ciyaartey wanaajinta heerka nolosha ee haweenka iyo carruurta. "Waxa aan aad u rabney in aan caawino dadkeena ka soo qaxay Muqdisho, laakiin dhaqaale ma aanan haysan. Iyada oo ay UNICEF mahaddeeda leeda-hay, carruurta iyo haweenku waxa ay maanta haystaan biyo ammaan ah waxaana ay dadka gudaha ku barakacay ee ku nool xerada u dhistey musqulo," ayuu yiri Sheekh Cumar.

Maanta, UNICEF waxa ay sii waddaa taageerada ay siiso dadka gudaha ku barakacay ee Jowhar. Dhowaan, waxaa la dhammeystirey olole nadaafadeed oo lala kaashadey Ururka Haweenka Jowhar kaas oo lagu beegsadey 20,000 oo qof.

## Hawsha UNICEF ee Biyaha, Fayadhowrka iyo Nadaafadda ee Soomaaliya

Ka timid bogga 1aad

habraaca (siyaasadda) arrimaha gudaha iyo kuwa la xiriira bixinta ilaha biyaha, awood u siinta maamullada in ay wanaajiyaan tayada qorsheynta, fulinta iyo kormeerka. Sidoo kale, waxaa taageero la siiyaa bixinta musqulaha iyo meelaha lagu gacmo dhaqdo.

Kooxaha UNICEF ee biyaha iyo fayadhowrka waxa ay sameeyeen habab aan qaali ahayn oo lagu dhiirigelinayo beddelidda dabeecadda, kor u qaadidda nadaafadda qofka iyo fayadhowrka degaanka oo heer guri iyo mid bulsho ah iyo kan dugsiyada, taas oo garab socota musqulo laga dhisayo dhammaan gobollada Soomaaliya. Dhismaha adeegyada fayadhowrka ee laga dhisayo dugsiyada, waxaa barbar socda macallimiinta oo lagu tababarayo waxba-rashada nadaafadda. Barnaamijka fayadhowrka iyo nadaafadda dugsiga ayaa ah mid ka mid ah waxyaabaha ugu muhiimsan barnaamijka fayadhowrka iyo nadaafadda degaanka. Heer guri, UNICEF waxa ay dhiirigelisaa si hab-boon u keydinta iyo u isticmaalidda biyaha la cabbo iyo hab-dhaqan gacan-dhaqasho oo habboon. Xerooyinka dadka soo barakacay iyo dhowr magaalo iyo beelood, ayaa laga qaybiyey qalabka fayadhowrka si ay bulshooyinka uga gargaaraan nadiifinta degaankooda. Qaadista dowladda hoose ay qaaddo qashinka iyo asturaaddiisa heer guri ayaa qayb ka ah nidaamyada biyaha ee magaalada.

Tababar ku saabsan sida maaddada koloriinta loogu daro ilaha biyaha iyo kaydka biyaha ee heer bulsho, taas oo qayb ka ah ka hortagga daacuunka, ayaa la qabtaa waqtiyada sanad kasta uu daacuunku soo noqnoqdo (Disembar-Juunyo) waxaana maaddada koloriinta hore loogu sii diyaariyaa degaannada oo dhan si loogula dagaal-lamo daacuun dilaaca.

UNICEF waxa ay si fiican ula shaqeysaa bulshooyinka, madaxda wakaaladaha biyaha iyo guddiyada arrimaha bi-yaha, kooxaha degaanka ee iskaa-wax-u-qabso ku shaqeeya, ganacsatada, ururada bulshada iyo NGO-yada, iyada oo dhammaan hoos taga dallada Xogxaynta Taageerada Soomaalida, Guddi-waaxeedka Biyaha, Fayadhowrka & Caafimaadka, oo ka kooban Hay'adaha Qaramada Midoobey, NGO-yada iyo deeq-bixiyeyaasha.

## Mahad loo celinayo deeq-bixiyeyaasha shariigga nala ah

Deeq-bixiyeyaasha UNICEF ee ugu waaweyn ee dhinaca Biyaha, Nadaafadda iyo Fayadhowrka ka qayb qaatey Waxqabad Bani'aadamnimo ahaan (iyaga oo u soo marsiiyey Habkii Yabooha Iskujira ee 2008 – CAP) iyo Soo-kabasho iyo Horumarin ahaan (Barnaamijka Caadiga ah ee Dalka – Qorshaha Qarmada Midoobey ee kalaguurka 2008 ilaa 2009).

| Waxqabadka | Deeq-bixiyaha shariigga ah |
|---|---|
| Adeeg bixinta WASH- Dayactirka iyo dhismaha ilaha biyaha; maareynta (PPP) iyo tababarka ka shaqeysiinta iyo dayactirka; deg-deg u bixinta biyo ammaan ah oo la cabbo oo la siiyo dadka gudaha ku barakacay iyo kuwa nugul (oo ay ku jirto ka hortagga shuban bi-yoodka daran); koloriin ku darid, bixinta kiniiniga aquatab iyo sahay kale oo la xiriirta WASH; dhiirigelinta ku daaweynta iyo si ammaan ah u kaydinta biyaha ee guriga; xiriirinta kooxda waxqabashka deg-degga ah. | Dhinacyada arrimaha degdegga ah– OFDA; qaaraan CAP oo aan meel loo cayimin oo ka yimid Finland, Norway, Netherlands, Denmark<br>Hanaanka biyaha ee muddada for– EC, USAID, Denmark iyo Guddiga Switzer-land ee UNICEF |
| Beddelidda hab-dhaqanka – dhiirigelinta fayadhowrka iyo nadaafadda, dhiirigelinta saabuun ku gacmo dhaqashada; isdhexge-linta caafimaadka iyo WASH, nafaqeynta iyo waxbarashada (quudinta ardayda dugsiyada iyo xarumaha caafimaadka, iwm) | Dhammaan kuwa kore |
| Awood dhisidda la siiyo dowladda iyo shariikyada, taageerada sameynta hab-raacyada (siyaadaha) biyaha, tababarka. | EC, USAID, Denmark, Guddiga Switzerland ee UNICEF |

**2008 CAP: Taageerada Deeqbixiyeyaasha iyo Waaxda**

| Deeq-bixiyaha | Waaxda |
|---|---|
| USAID/OFDA | WASH, Caafimaadka, Nafaqeynta, CHEP |
| Norway | Waxbarashada, WASH, Caafi-maadka, Nafaqeynta |
| Denmark | WASH, Caafimaadka, Waxba-rashada, CHEP |
| Japan | Caafimaadka |
| Sanduuqa Dhexe ee Wax ka qabashada Arrimaha Deg-degga ah (Qaramada Midoobey) | Nafaqeynta |
| SIDA | CHEP, Waxbarashada |
| DFID | Waxbarashada, Nafaqeynta |
| Netherlands | Caafimaadka, WASH |
| Italy | Waxbarashada |
| Qoondeynta gaarka ah ee UNICEF ee Hantida Caadiga ah * | Caafimaadka |
| Ireland | Waxbarashada, CHEP |
| Finland | WASH |
| Sanduuqa Wax ka qabashada Bani'aadamnimada | Caafimaadka |
| Guddiga Faransiiska ee UNICEF | Nafaqeynta |
| Sanduuqa Mareykanka ee UNICEF | CHEP |
| UNHCR | CHEP |
| Guddiga Denmark ee UNICEF | Nafaqeynta |
| | |

Isgaarsiinta CHEP, HIV, Awood-siinta iyo Ilaalinta; DFID– UK Waaxda Horumarinta Caalamiga ah; EC Guddiga Reer Yurub; OFDA-US Gargaarka Masiibooyinka Dibadda; PPP-Iskaashiga Ganacsatada iyo Dowladda; SIDA-Swedish Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta; USAID- Hay'adda Mareykanka ee Horumarinta Caalamiga ah.

* Qoondeyn gaar ah oo loogu talagalay Masiibooyinka ka dhashey Qiimaha Cuntada

In kasta oo taageeradii deeqsinimada lahayd ee deeq-bixiyeyaashu ay UNICEF u suurtagelisay in ay wax ka qabato baahiyo bani'aadamnimo oo degdeg ah, waxqabadkeena degdegga ah waxaa weli haysta dhaqaale yaraan. Baahida UNICEF ee aan la daboolin ee ku jirey Habkii Yabooha Iskujira ee 2008 – CAP ee USD 65,837,985 waa USD 24,316,472. UNICEF waxa ay u baahan tahay USD 5,100.692 si ay wax uga qabato baahida degdegga ah ee biyaha, fayadhowrka iyo nadaafadda ee 2008.

**Wixii xog dheeri ah oo ku saabsan barnaamijkeena ama sida aad noo taageeri karto, fadlan nagala soo xiriir:**


| | | |
|---|---|---|
| **Christian Balslev-Olesen, Representative** | **cbalslev@unicef.org** | **+ 254 722 514 569** |
| **Denise Shepherd-Johnson, Chief of Communication** | **dshepherdjohnson@unicef.org** | **+ 254 722 719 867** |
| **Robert Kihara, Communication Officer** | **rkihara@unicef.org** | **+ 254 722 206 883** |


**Nagu soo booqo www.unicef.org/somalia**


UNICEF ©Carruurteena